my ENERGY saving home



# Sida loo isticmaalo qaboojiyahaaga cusub

Somali | Soomaali

## Tallooyin aan kula wadaageyno oo kaa caawinaya inaad sida ugu haboon u isticmaasho qaboojiyaha

### Ku qiyaas heerkulka meel fiican oo uu biilka korontada kaaga yaraan karo

Xusuusnow ina marka la gaaro xilliyada kuleelaha aad u badesho 'qabow' ❄ ama 'kuleyl' ☀ marka la galo qaboobaha.

Ku qiyaas heerkulka inta u dhaxeysa 18 °C ilaa 20 °C marka la galo qaboobaha.

Ku qiyaas heerkulka inta u dhaxeysa 24 °C ilaa 26 °C marka ay tahay xilliyada kuleelaha. Xataa maalmaha ay cimiladu kulushahay, qiyaastan waa mid ay ku raaxaysan karaan dadka intooda badan.

**Xusuusnow: Darajo** kasta oo aad kordhiso ama hoos u dhigto qaboojiyahaagu waxay saamaynaysaa kharashka tamartaada ilaa 15%.

### Ku raaxayso waqti dheer

Isticmaal saacada ku xiran qaboojiyahaaga si uu iskiis isugu daaro xilliyada loo baahan yahay inuu is daaro.

Xir daahyadaada marka uu qaboojiyaha ama hiitarka kuu shidan yahay. Taasi waxay:

- meesha ka saari doontaa kulaylka iyo hawada qabow inta lagu jiro xilliga kuleylaha
- kuleyl hakuu ahaato gudaha oo qaboowga yuusan soo gelin xilliga qaboobaha.

Qaboojiyaha single ka ahi ma kululayn karo mana qaboojin karo guriga oo dhan. Haddii aad rabto inaad qolkaagu kuu kululaado ama aad qaboojiso, xidh albaabbada qolka uu qaboojiyaha/hiitarka ka daaran yahay.

Ku qiyaas marawaxada Auto ama High si aad u kordhiso socodka hawada.

### Sida aad ugu isticmaali karto qaboojiyahaaga si hufan

Isticmaal setting ka awooda badan (Powerful) si qolku uu dhaqsi kuugu kululaado ama uu dhaqsi kuugu qaboobo. Tani waa inay qaadato 15 ilaa 20 daqiiqo oo keliya. Xaqiiji in qaboojiyaha/heitarkaagu uu iskiis dib isugu celiyo qiyaastii caadiga ahayd. Marka la gaaro qaboobaha, qaboojiyahaaga ayaa laga yaabaa inuu qaato 10 ilaa 15 daqiiqo inta uusan soo tufin hawo kulul. Mashiinada waaweyn ayaa laga yaabaa inay maalintii xoogaa istaagaan si ay barafka gudaha geli kara meesha uga saaraan.

Demi qaboojiyahaaga/hiitarkaaga marka aanad guriga joogin. Maadaama qaboojiyayaashu ay si dhakhso ah wax u kululayn karaan una qaboojin karaan, tani waxay kaa caawin doontaa inaad yarayso kharashka tamarta uu isticmaalayo.

### Sidii aad sare ugu qaadi lahayd waxtarka

Si joogto ah u nadadiifi filtarradaada. Markaad siigada/busta ka nadiifiso, qaboojiyahaaga/hiitar kaaga wuxuu u shaqeyn doonaa sida ugu fiican. Waxaan bogga xiga kuugu qornay tilmaamo sahlan oo ku saabsan sida loo nadiifiyo qaboojiyaha/hiitarka.

homes victoria

VICTORIA State Government

## Nadaafinta qaboojiyahaaga

Filtarada qaboojiyahaagu waxay soo jiitaan boodhka iyo siigada. Si uu si fiican kuugu shaqeeyo, u nadiifi filtarrada si joogto ah.

Haddii ay filtarada boor badan yeeshaan, waxa laga yaabaa in qaboojiyahaaga:

- uu isticmaalo koronto dheeraad ah
- uu sameeyo shanqar dheeraad ah.

Inta jeer ee loo baahan yahay inaad nadiifiso waxay kuxirantahay inta aad isticmaasho:


- ugu yaraan laba jeer sannadkii
- bil kasta haddii aad isticmaasho badanaa maalin kasta.

Haddii ay kugu adag tahay inaad adigu nadiifiso filtarada, caawimo weydiiso saaxiib, deriska, shaqaalaha ku taageera, ama xafiiska degaankaaga.

**!** **In yar ood si degdeg ah u nadiifiso waxay kuu beekhaamin kartaa kharashka, ogoowna sida loo nadiifiyo filtarrada waxay u sahlan tahay sida nalka ood bedesho oo kale!**


**Haddii aad qabto xanuuno sambabada ah, waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad si joogto ah u nadiifiso filtarada.**

### 1




Hubi marka hore inaad qaboojiyaha demiso. Si aad usoo saarto filtarrada, fur qaybta hore oo si tartiib ah uga soo saar meesha ay kujiraan.

### 2



Isticmaal faakuum si aad boodhka uga saarto filtarka. Haddii boodh uu kusii haro, biyo raaci filtarka oo si tartiib ah ugu dhaq buraash jilicsan. Meel hoos ah oo hawo leh ku qalaji filtarka.

### 3



Marka uu qalalo, dib u geli filtarka meeshii aad kasoo saartay. Xir daboolka qaboojiyaha adoo si tartiib ah uga riixaya labada dhinac iyo dhexda.

**Booqo website ka hoose si aad u hesho hage muuqaal ah oo ku saabsan sida loo nadiifiyo filtarka qaboojiyaha.**

**youtube.com/watch?v=oEg-oLwGZZs&t=90s**

## Wax badan ka ogow

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, ama aad u baahan tahay tarjumaad, booqo

**homes.vic.gov.au/how-do-i-use-my-new-appliances**

wac **13 11 72** ama iimayl ugu dir **energyefficiencyprogram@homes.vic.gov.au**

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.
© Gobolka Victoria, Homes Victoria, bisha Juun 2025. Daabacaad ay maamusho Finsbury Green (HV021224)